**WAR MURTIYEED WADAJIR AH OO AY SOO SAAREEN URURRADA SAXAFIYIINTA IYO WARBAAHINTA SOOMAALIYEED EE MADAXA-BANNAAN**

**MUQDISHO, Soomaaliya 4 Juun 2022** – Maanta oo ay taariikhdu tahay 4 Juun 2022, Ururrada Saxafiyiinta iyo Warbaahinta Soomaaliyeed ee madaxa-bannaan ayaa kulan wadatashi ah ku yeeshay magaalada Muqdisho iyagoo diiradda ku saaray isbeddellada cusub ee ka dhacay dalka kaddib doorashadii madaxtinnimada ee dhacday 15kii May 2022 iyo xaaladda xorriyadda warbaahinta ee dalka, oo heerkii ugu liitay gaartay shanti sano ee lasoo dhaafay.

- Ururrada Saxafiyiinta iyo Warbaahinta Soomaaliyeed waxay si gaar ah u falanqeeyeen xeerka qallafsan ee warbaahinta ee la meelmariyey bishii August 2020, xarigga iyo beegsiga lagu hayo saxafiyiinta Soomaaliyeed, adeegsiga Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed ee loo adeegsado warbaahinta, caqabadda ka taagan helista xogta iyo inaanu jirin sharci difaacaya xaqa helista xogta ee muwaadiniinta Soomaaliyeed.

- Ururrada Saxafiyiinta iyo Warbaahinta Soomaaliyeed waxay sidoo kale falanqeeyeen noocyadii kala geddisnaa ee tacaddiyadii loo geystay warbaahinta iyo saxafiyiinta Soomaaliyeed, iyo inaan dadkii geystay tacaddiyadaasi aanan weli lala xisaabtamin, iyagoo walaac ka muujiyay heerka liita ee tacadiyada xuquuqda aadanaha ee ka jira dalka.

- Ururrada Saxafiyiinta iyo Warbaahinta Soomaaliyeed waxay ku baaqayaan Dowladda Cusub ay muujiso rabitaan ku aaddan inay si daacadnimo ah u wajahdo waxna uga qabato tacaddiyada aan la isu ciqaabin ee loo geysto warbaahinta iyo saxafiyiinta, ay dowladda ka digtoonaato dhaqamadii laga bartay Dowladdii hore ee cabburinta saxaafadda.

- Wadatashiga kaddib, Ururrada Saxafiyiinta iyo Agaasimeyaasha Warbaahinta Soomaaliyeed waxay soo saareen baaq ku socda Madaxweynaha cusub ee JFS,

mudane Xasan Sheekh Maxamuud, Guddoomiyaha Golaha Shacabka iyo Guddoomiyaha Aqalka Sare iyo guud ahaan xubnaha Barlamaanka Federaalka, iyo dowlad gobolleedyada dalka.

- Ururrada Saxafiyiinta iyo Agaasimeyaasha Warbaahinta Soomaaliyeed waxay ku baaqayaan in gurmadka deg deg ah laga gaaro dadweynaha u dhimanaya gaajada iyo harraadka ka jira dalka ee ka dhashay abaarta ku habsatay dalka. Warbaahinta madaxa-bannaan waxaan usoo jeedinaynaa inay kaalinteeda ka qaadato sidii dhibaatada jirta loo soo bandhigi lahaa, isla markaana loo badbaadin lahaa dadka dhimanaya, dadweynaha loogu wacyigelin lahaa baaxadda dhibaatada jirta.

Haddaba waxaan soo jeedinaynaa qodobada soo socda inay dowladda cusub meelmariso:

**Waxaan ku baaqeynaa:**

1. In la dhowro xorriyadda hadalka Soomaaliya, isla markaana si deg deg madaxweynaha cusub ee JFS iyo madaxda maamul gobolleedyada uu u soo saaraan xeer joojinaya xarigga sharci darrada ah ee lagu hayo saxafiyiinta Soomaaliyeed guud ahaan dalka, isla markaana faraya hay'adaha amniga iyo garsoorka inay ixtiraamaan xorriyadda warbaahinta si waafaqsan qodobada 18aad iyo 32aad ee Dastuurka.

2. In la furo dib u eegista iyo wax-ka-beddelka **Xeerka Warbaahinta ee August 2020**, laguna daro talooyinka ururrada saxaafadda iyo warbaahinta si uu u noqdo xeerka mid la jaanqaadi kara dastuurka dalka iyo xeerarka kale ee caalamiga iyo kuwa gobol ee ku saabsan xuquuqda aadanaha iyo xorriyadda saxaafadda. Waana in Xeerka Warbaahinta ku caddahay dhowrista xuquuqda dumarka iyo tan shaqaalenimo ee warfidiyeenka. Waana in la is waafajiyaa Xeerka Warbaahinta heer federaalka marka la dhameeyo dib u eegista iyo sixitaanka.

3. In Madaxweynaha JFS uu soo saaro hakin (**moratorium**) **adeegsiga Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed** ee loo adeegsado warbaahinta iyo saxafiyiinta. Saxaafaddu **waa mihnad xalaal ah**, ma ahan denbi, kamana dhalan karto ciqaab.

4. In **baaritaan caddaalad ah lagu sameeyo dhammaan dilalka**, dhaawacyada iyo falalka tacaddiga ah ee loo geystay saxafiyiinta Soomaaliyeed, loona oggolaado dhibbanayaasha iyo qoysaskooda inay dacwad ka furtaan maxkamadaha sharciga ee dalka si dadkii ka danbeeyay tacaddiyadaasi loo horkeeno maxkamad caddaalad oo run ah.

5. In Madaxtooyada Villa Somalia iyo mas'uuliyiinta kale ee dowladda ay si cad u cambaareeyaan weerarada iyo tacaddiga loo geysto saxafiyiinta, loogana digo saraakiisha dowladda oo dhan inay tacaddi u geystaan saxafiyiinta iyo warbaahinta, kuwa geystana lagula xisaabtamo si ay u dhammaato isla xisaabtan la'aanta daashatay dalka.

6. In saxaafadda loo furo helista xogta, xafiisyada dowladda heerarkeeda kala duwanna ay joojiyaan in muuqaallo iyo sawirro lasoo jarjaray lala wadaago warbaahinta. Xafiisyada muhiimka ah sida Madaxtooyada, Xafiiska Ra'isul Wasaaraha, Baarlamaanka iyo Wasaaradaha in saxaafadda madaxa-bannaan ay kasoo warami karaan ayna ku yeeshaan wakiillo wareed. Waana in Madaxweynuhu dhiirigeliyaa in kulamada jaraa'id ay noqdaan kuwo furan oo xogta lagula wadaago saxaafadda iyo dadweynaha.

7. Inaan la isticmaali karin makarafoonnada iyo logo-yooyinka ay leeyihiin warbaahinta madaxa-bannaan ee sida sharci darrada ah loo geeyay madaxtooyada Villa Somalia

iyagoo aanay joogin saxafiyiinta warbaahintaasi.

8. In la dardargeliyo lana soo saaro xeer oggolaanaya xaqa helista xogta si waafaqsan **Qodobka 32aad** ee Dastuurka.

9. Marka la dhameeyo dib u eegista iyo sixitaanka Xeerka Warbaahinta, in la dardargeliyo **dhismaha Golaha Warbaahinta oo madax-bannaan** oo Baarlamaanka ku leeyahay kor-joogteyn, xubnihiisuna ay ku yimaadaan xulis caddaalad ah oo loo dhan yahay, kana fog saameynta dowladda. Waana in warbaahinta madaxa-bannaan oo ay ku jiraan dumarka ay ka qaataan doorkooda iyagoo ah saamiley ee aan ahayn marti.

10. In la dardargeliyo, lana dhammeystiro dhismaha **Guddiga Xuquuqda Aadanaha** oo weli aan la dhameystirin si loo baaro, loona diiwaangeliyo tacaddiyada xuquuqda aadanaha eel aga galo muwaadiniinta Soomaaliyeed, loo-lana xisaabtamo kuwa ku xadgudba xuquuqda aadanaha. Sidoo kale, Dowladda Cusub waa inay dardargelisaa dhisidda **garsoor madax-bannaan** oo caddaalad ah oo muhiim u ah dhismaha nabad waarta iyo dimuqraadiyad ka hirgasha Soomaaliya.

11. Inaan xafiisyada dowladda iyo xilalka kala duwan aan loo oggolaan inay qabtaan dadka galay ama ku eedeysan tacaddiyada xuquuqda aadanaha oo ay ku jiraan tacaddiyada ka dhanka ah xorriyadda warbaahinta iyo xuquuqda saxafiyiinta.

12. In warbaahinta guud ahaan isugu timaado shirweynaha warbaahinta Soomaaliyeed kaasoo waqtiga la qabanayo aan dib kasoo sheegi doono.

-DHAMMAAD-